


WAXQABADKA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

Gaadiidka



Maadaama gobolku yahay mid baadiye ah, gaadiidka dadweynaha ee Vermont waa xaddidan yahay. Vermonters inta badan waxay ku safraan baabuurtooda. Shidaalka baabuurta badi-basiinka iyo naaftada—waxa ay hawada ku sii daayaan wasakhawga waxyeelada leh iyo gaaska dhulka kulkiisa kordhinaya (greenhouse gases). Si aynu doorkeena uga ciyaarno una samayno isbeddel ah dhanka cimilada iyo caafimaadkeena Vermont waa in ay hoos u dhigtaa qiiga gaadiidka, kuwaas oo ah isha ugu wayn ee gobolkayaga ee uu ka dhasho wasakhawga cimilada. Guud ahaan, waxaanu tan ku samayn karnaa innagoo u gudbayna isticmaalka baabuurta korantada, abuurista gaadiidka dadweynaha ee u adeegaya meelaha miyiga ah, fudaydinta socodka iyo baaskiil wadida, iyo ku noolaanshaha tuulooyinka iyo xarumaha magaalada.

Faa'iidooyinka ka dhalanaya baddalitaanka qaabka aynu usafarno

Lacagta la Kaydiyay

libsashada gaadhi korantada ku shaqeeya waxa ay noqon kartaa mid la awoodi karo iyada oo la isticmaalayo gunnooyin, waxana ay ukaydin kartaa darawalka \$1500 sanadkii oo ah shidaalka iyo dayactirka gaadhiga. (Eeg xagga dambe gunnooyinka ka dhigi kara iibsiga EV-ga mid la awoodi karo.)

Helitaanka & Sinaanta

Marka gaadiidka dadweynaha la heli karo, qof walba, oo ay ku jiraan xubnaha bulshadeena ee ugu nugul, waxay heli karaan agabyada iyo adeegyada.



Caafimaadka Dadweynaha oo

Wanaagsan

Gaadiidka korantada ku shaqeeya waxa ay yareeyaan wasakhawga hawada aynu neefsano. Tani waxay kor uqaadaysaa caafimaadka dadka.

Cimilada-Ku Habboon

Marka baabuurta ku shaqeeyaan koronto halkii gaaska, waxay sababaan wasakhaw cimilada ah oo aad uyar.

XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov



Adeegyadee ayaan heli karaa si ay iiga caawiyaan inaan ku dhex socdaalo gobolka?

Gaadiidka dadweynaha

Bookho! Vermont waxay bixisaa macluumaadka ku saabsan ku socdaalka baska, tareennada, doonta, baabuurka, iyo waxyaabo kale oo badan.

- Xulashooyin badan oo loogu talagalay waayeelka iyo dadka naafada ah.
- Aalado ayaa kaa caawin kara qorsheynta safarka ama la socodka baska.
- Waxaad ku kasban kartaa abaalmarino adiga oo isticmaalaya gaadiidka dadweynaha.
- Loo-shaqeeyayaasha iyo bulshooyinka waxay baran karaan sida loo kordhiyo gaadiid la isku halayn karo, oo hufan.

Booqo Go! Vermont adoo galaya barta www.connectingcommuters.org ama wac 800-685-RIDE (7433).

Hel kaalmo dhaqaale si aad u iibsato baabuur koronto ku shaqeyaa

Waxaad isticmaali kartaa gunnooyinka gobolka iyo federaalka si aad lacag u kaydsato markaad iibsantayso baabuur koronto ku shaqeyaa oo cusub ama la isticmaalay. Kuwa leh dakhliyo uqalmaya waxay kaydsan karaan ilaa \$14,000.

Wax badan ka baro www.driveelectricvt.com/incentives.

Iskaan garee si aad wax uga ogaato barnaamijyadan iyo waxyaabo kale oo badan



Codkaaga ayaa muhiim ah!

Vermonters waxay durba dareemeen saameynta isbeddelka cimilada oo jiiilaaladu gaabteen, xagaagu kululaaday, abaaro, iyo fatahaado dheceen. Qorshaha Waxqabadka Cimilada wuxuu soo jeedinayaa talooyinka hoos loogu dhigayo gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse gases) wuxuuna taageerayaa bulshooyinka si ay ula qabsadaan isbeddelka cimilada. Xafiiska Waxqabadka Cimiladu waxa uu rabaa in uu ogaado: waxqabadyada Gobolka ee wax lagaga qabanayo isbeddelka cimilada kuwee ayaa adiga muhiim kuu ah?

XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov